



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 8, 2022

Ku socota: Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada iyo Hay'adaha (Fadlan fariintan la wadaaga kuwa hela adeegyada I/DD iyo qoysaskooda.)

Ujeedada: Boosas ka bannaan guddi-hoosaadka Guddiga Oregon u qaabilsan Xanuunada Autism-Ka

Guddiga Oregon u qaabilsan Xanuunada Autism-Ka (OCASD) ayaa raadinaysa xubnaha guddi-hoosaadka oo matala bulshada naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ee gobolka. OCASD hawsheedu waa in ay caawiso dadka reer Oregon ee qaba cudurka autism-ka iyo qoysaskooda oo u horseedo nolol hodan ah oo buuxda iyada oo laga shaqeynaya sidii loo wanaajin lahaa adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin.

Waxaa jira boosaska shaqo oo bannaan oo loogu talagalay dadka qaba cudurka autism-ka iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda, daryeelayaasha, daryeel bixiyayaasha iyo xirfadlayaasha adeega bulshada. Guddigu waxay dhiirigelinaysaa codsiyada ka socda dadka leh kala duwanaanshaha dhanka aragtida oo ay ku jiraan dadka midabyada kala duwan leh, LGBTQIA2S+ dadka iyo kuwa ah bulshooyinka miyiga.

OCASD waxay rajeynaysaa in codsadayashu ay awoodi doonaan in ay ku lug yeeshaan arrimaha dhabta ah ee iyaga khuseeya. Haddii aadan haysan wakhti aad kaga qayb qaadato kulamada, guddigu waxay jeclaan lahayd in ay wax ka maqasho waxa adiga kuu shaqeynaya, waxa aan shaqeynaynin iyo waxa aad u baahan tahay staff@orcommissionasd.org.

Guddi-hoosaadyada leh boosas ka bannaan

- [Maareynta Nolasha la qabo ASD](#): Xubnaha ka tirsan qoyska iyo dadka waaweyn ee qaba cudurka autism-ku waxay u baahan yihiin taageero wax ku ool ah si loo qorsheeyo adeegyada iyo taageerada kala duwan ee ku kala baahsan daryeelka caafimaadka, waxbarashada iyo nidaamyada adeega bulshada. Guddi-hoosaadkani waxay diiradda

saaraysaa caawimaada qoysaska iyo dadka qaba cudurka autism-ka in ay qorsheeyaan baahiyahooda iyada oo la xaqiijinayo hagiid dhammeystiran oo isku duba ridan ee adeegyadani inta la nool yahay.

- [Adeegyada Bulshada iyo Taageerooyinka Dadka waaweyn](#): Muhiimada koowaad ee guddi-hoosaadku waa in la go'aamiyo sida wanaagsan ee adeegyada gobolka iyo kuwa gaarka ah u buuxinayaan baahiyada adeega bulshada iyo taageerada ee carruurta, qoysaska iyo dadka waaweyn. Dhinacyada diiradda la saarayo waxaa ku jira ka qayb galinta bulshada, gaadiidka, guryaha, daryeelka shakhsi ahaaneed iyo shaqada.
- [Tababarka Xirfadeed](#): Guddigani waxay ka shaqeyneysaa caawimaada dadka qaba cudurka autism-ka fahmaan awoodooda ugu badan iyada oo la xaqiijinayo in xirfadlayaasha, dadka qaba cudurka autism-ku ee naftooda u dooda iyo qoysaska leh carruur qabta cudurka autism-ku ay aqoon ku filan u leeyihiin cilmiga hab-dhaqanka aadanaha si loo fahmo caqabadaha ay la kulmaan dadka qaba cudurka autism-ku.

Si aad u codsato, weydii su'aalo, wadaag faallooyinka ama raadi macluumaad dheeraad ah, booqo <https://www.orcommissionasd.org/Page/49> ama email u dir staff@orcommissionasd.org. Waqtiga loo qabtay codsigu wa Abriil 30.

Si Daacadnimo leh,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.